

# ISKA ILAALI QABOWGA LANA SOCO WARARKA
## HAWADA LAXIRIIRTA XIRITAANKA ISKUULKA

**Marka fasallada ay Qasab noqoto in la xiro Hawada Qabow Darteed ! Waa idaad isla markiiba ogaato.**
Dugsiyada Magaalada Columbus waxay diyaar u yihiin soo celinta xagaaga iyo maalmahaas marka cimiladu ay saameyn weyn ku yeelan karto maalinta dugsiga ilmahaaga ... iyo maalinta aad mashquulsan tahay. Hubso inaad hore u sii qorsheysato.

**LASOCO:** wararka ku saabsan dib-u-dhaca ama baajinta fasallada, waxqabadyada dheeraadka ah ee manhajka, safarrada goobaha kabax-san iskuulka, iyo / ama dhacdooyinka cayaaraha ardayda ayaa dhowr siyaabood loola wadaagaa.

- Hubi in xiriirka aad la leedahay faylka ee macluumaadka dugsiga ilmahaaga uu yahay mid sax ah. Haddii aad rabtid in aad cusbooneysid macluumaadkan, la xiriir xafiiska weyn ee dugsiga ilmahaaga ama waxaad booqataa **Bogga Waalidka ee www.ccsoh.us.**
- Soo dejiso **Mobile Appka Dugsiyada cusub ee Magaalada Columbus .** Halkani waa meesha ugu horeysa ee aan la wadaagno wararka ku saabsan "maalmaha barafka" iyo xiritaanno kale oo ah iskuulka oo fariin deg-deg ah u dira taleefoonkaaga ama qalabka moobaylkaaga. Si aad u soo dejisato app bilaash ah, raadso "Dugsiyada Magaalada Columbus" ee dukaanka barnaamijka ku yaal qalabkaaga gacanta.
- La soco wararka ku saabsan telefishanka maxaliga ah iyo raadiyaha.
- Raac **Facebook** iyo **Twitterk** (@ColsCitySchools) Dugsiyada Magaalada, ama fiiri boggeena.
- Dhammaan qoysaska iyo shaqaalaha waxaa loo diri doonaa wicitaan toos ah oo ka socda nidaamka telefoonka ee degmada.

**YEELO QORSHE LABAAD:**
Marka cimilada hawada ay saameeynayso isu-socodka subixii,
Kormeeraheenna Guud wuxuu qorsheynayaa in uu go'aamiyo haddii uu joojinayo fasalada ugu dambeyn 6:00 g.h. Haddii cimilada la saadaaliyo ay qallafsantahay gelinka dambe, fasallada waxaa laga yaabaa duhurkiiba in lafasaxo. Hayso qorshe labaad oo ilmahaaga maalintiisa aad horey ugu dajisatay,

- **Kormeerk:** Ilmahaaga miyey mas'uul ahaan ma isku-filanyahiin iney keligood guriga joogaan ama ma u baahan-yihiin qof inuu la joogo?
- **Cuntada Caafimaadka leh:** Suuro-gal matahay in cunugaagu cuno cunto nafaqo leh quraac iyo qado?
- **Goob Badbaado:** haddii fasallada horey loo sii daayo, ilmahaagu ma guriguu tagaa ama meel kale? Haddii ilmahaagu ka yar yahay da'da 8, ma jiri doonaa qof kula kul-ma meesha basku istaago?
- **Ka qab ahaanshaha wax-qabadka:** Maxay tahay waxqabadyada dhanka amaanka ee aad u haysid ilmahaaga inuu sameeyo haddii ay guriga joogaan waqti aan la filayn

Jawaabaha **Su'aalaha Badan ee la Is Weydiiyo** iyo Talooyin **Qorshaha Bedelkeeda ah,** wac **Xiriirka Macaamiisha ee 614.365.8888 ama booqo www.ccsoh.us oo raadi "Cimilada."**

COLUMBUS CITY SCHOOLS

READY4SUCCESS